JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIDA

WASAARADDA WAXBARASHADDA IYO BARBAARINTA

XAFIISKA MANAAHIJTA

# AF SOOMAALI

## FASALKA LABAAD



# AF SOOMAALI

## FASALKA LABAAD

## 2

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBAARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

**Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho.**

**Waxa lagu daabacay Madbacadda Qaranka.**
**Xamar — 1976**

# HORDHAC

Buugaggaa Af Soomaaliga ee Dugsiyda Hoose (I - VI) waa kuwo, qoriddooda lagala kulmay dhibaatooyin gaar ah; hase yeeshe, waa kuwo, haba koobnaadeene, ka jawaabaya ujeeddooyinkii laga lahaa barashada Afka.

In kasta oo barashada afafku ay ka unkamaan barashada Dhegeysiga, Hadalka, Akhriska iyo Qoraalka, haddana waxa jirta in uu af waliba leeyahay waxyaaba isaga u khaas ah. Kuwaas oo keenaya in habka barashadiisu ay ka duwanaato ka afafka kale oo dhan. Qorayaasha buuggani iyaga oo taas maskaxda ku haya, isla markaa tixgelinaya waxyaabaha badan ee afafku ay wadaagaan, ayay isku dayeen in ay buugga geliyaan **Wixii** iyo **Intii** ardayda heerkan loo dhigi lahaa.

Afarta qaybood ee afka (dhegeysi, hadal, akhris iyo qorid) ee lagu tilmaamo awoodaha salka ah barashadoodu sidaa uma kala qoqobna. Waxana dhici karta in afarta qaybood casharr qura carruurta lagu wada baro. Sidaas awgeed, ayaanay suurtoobahayn in la kala saarsaaro awoodihii afka ee la rabey in carruurta la baro, oo la yiraahdo xisaddan waxa ilmaha la barayaa «Dhegeysi» ta dambena «Akhris».

Iyada oo taasi ay jirto, ayaa haddana kollayba loo baahanyahay in loo qaybiyo Manhajka ama buugagga Afka qaybo u fududeeya macallinka jaangooyinta iyo raacidda tusaalooyinka ku dhigan.

Waxa iyana madhaafaan ah in halkan lagu xuso in Manhajka Af Soomaaligu siiba ka fasallada I, II iyo III uu aad iyo aad muhiim u yahay, la socod la'aantiisuna ay wax u dhimi karta fulinta ujeeddooyinka laga leeyahay buuggan. Manhajku tafaasiil iyo sharax fara badan ayuu ka bixinayaa sidii ilmaha loo bari lahaa xubnaha ama awoodaha kala duwan ee Afka. Manhajka aannu samaynay waa mid aannu is niri dhagax laba shimbirood ha ku wada dilo: macallinka waa in uu u ahaadaa marjac u jideeya **Wixii** iyo **Intii** uu ilmaha u dhigi

lahaa; isla markaa ha u noqdo manhajku macallinka tilmaame (Guide or Teacher's Handbook) ka kaaliya una habeeya baraha wixii uu u dhigi lahaa carruurta.

Waxa mahad iyo ammaan weynba aanu u jeedineynaa qorayaashii buuggan oo ah: Axmed Guure Cali, Yuusuf Aadan Suleymaan, Ismaaciil Muuse Nuur, Axmed Cabdillaahi Boqorre, Axmed Maxamed Qaaddi, Maryan Weheliye Barre, Ibraahim Faarax Jooj, Cismaan Jamac Aadan, Maxamed Xaaji Cabdi, Cabdi Xaaji Dooddi, Cabdiraxmaan Maxamad Xisaam. Waxa iyaguna gacan ka geystey xagga heesaha buuggan macallimiinta ah Maxamed Cabdillaahi Riiraash iyo Siciid Saalax Axmed. Waxa kale oo aanu u mahad naqaynaa dhammaanba dadkii kale ee suurageliyey soo saaridda buuggan; dadkaas oo kala ah C u m a r S a a l i m A x m e d oo musawirrada buuggan sameeyey iyo makiinad garaacayaashii buugga garaacay.

Ugu dambayntii, waxa si gaar ah u mahadsan Madaxda iyo Shaqaalaha Wakaaladda Madbacadda Qaranka oo xil gaar ah iska saaray daabacaadda buuggan.

**Bashiir Faarax Kaahiye**
Maamulaha Xafiiska Manaahijta

## Casharka Kowaad

### AQOON LA'AAN (Hees)

**Aqoon la'aani waa iftiin la'aane.**
**Aqoon la'aani waa iftiin la'aane.**
**Waa aqal iyo ilays la'aane.**
**Waa aqal iyo ilays la'aane.**

**Ogaadaa, ogaadaa, dugsiyada ogaadaa.**
**O aada o aada walaalayaal oo aada**

**Waa oomanaan iyo abaare.**
**Waa oomanaan iyo abaare.**
**Omos iyo oon biyo la'aane.**
**Omos iyo oon biyo la'aane.**

**Ogaadaa, ogaadaa, dugsiyada ogaadaa.**
**O aada o aada walaalayaal oo aada**

**Indhaha aan ku kala qaadne.**
**Indhaha aan ku kala qaadne**
**Ifka ugu ilbaxsanaane.**
**Ifka ugu ilbaxsanaane.**

**Ogaadaa, ogaadaa, dugsiyada ogaadaa.**
**O aada o aada walaalayaalow aada**

I. **Weydiino :**

1. Yaa tiriyey heesta?
2. Heestu maxay inaga waaninaysaa?
3. Dugsiyada maxaa lagu bartaa?
4. Maxaa loo yiraahdaa aqoontu waa ilays?
5. Waa maxay waxtarka waxbarashadu?

## Casharka Labaad

### IMMINKA:

| | |
|---|---|
| Anigu | Waxa aan ahay arday. |
| Adigu | Waxa aad tahay arday. |
| Iyadu | Waxa ay tahay ardayaad |
| Isagu | Waxa uu yahay arday. |
| Annagu | Waxaannu nahay arday |
| Idinku | Waxa aad tihiin arday. |
| Innagu | Waxa aynu nahay arday. |
| Iyagu | Waxa ay yihiin arday. |

### MAR HORE (waqti tegey):

| | |
|---|---|
| Anigu | Waxa aan ahaa arday. |
| Adigu | Waxa aad ahayd arday. |
| Iyadu | Waxa ay ahayd ardayad. |
| Isagu | Waxa uu ahaa arday. |
| Annagu | Waxa aannu ahayn arday. |
| Idinku | Waxa aydin ahaydeen arday |
| Innagu | Waxa aynnu ahayn arday. |
| Iyagu | Waxa ay ahaayeen arday. |

### LAYLIS

1. **Weydiino:**

   1. Caashi maxay tahay?
   2. Caashi maxay ahayd?
   3. Idinku maxaa aydin tihiin?
   4. Idinku maxaad ahaydeen ?
   5. Innagu maxaa aynnu ahayn?

2. **Meelaha maran buuxi :**

1. Adigu waxaad .......................... shaqaale.
2. Iyadu waxay .......................... shaqaale.
3. Isagu waxa uu .......................... shaqaale.
4. Annagu waxa aannu .......................... arday.
5. Idinku waxa .......................... beeraley.
6. .......................... waxay tahay ganacsato.
7. .......................... waxa aynnu nahay shaqaale.

## Casharka Saddexaad

Guga roob baa **di'i doona.**
Beerahaa **bixi doona**
Cuntadaa **badan doonta.**
Aroorta goor hore ayaan **toosi doonaa.**

Haddii uu Axmed dedaalo, imtixaanka wuu **ku guulaysan doonaa.**

Barayaashiisuna way ammaani doonaan. Waalidkiisuna way **jeclaan doonaan.** Waana ay ku faani **doonaan.**

Aamini dugsiga goor hore ayay tegi **doontaa.**

Saynab habeen dambe aad bay af Soomaaliga u akhrisan **doontaa.**

## L A Y L I S

1. **Weydiino :**

1. Berri **maxaad sameyn** doontaa?
2. **Fasaxa xaggee baad tegi doontaa?**
3. **Galabta xaggee baad tegi doontaa?**
4. **Galabta maxaad ciyaari doontaa?**
5. **Berrito dugsiga immisada ayaad iman doontaa?**

2. **Ereyada hoos ku qoran, ku buuxi meelaha maran.**

Doonaa, doontaa, doontaan, doonaa.

1. Axmed berrito wuu iman ..........................
2. Caawa Caashi waa ay ciyaari ..........................
3. Adigu galabta waa aad seexan ..........................
4. Iyagu mar dhaw bay tegi ..........................
5. Annagu berrito waannu nasan ..........................
6. Idinku shaah baad cabbi ..........................

3. **Erayadan weero soo geli.**

Qaday, faan, habeen dambe, mardhaw, ammaan.

Casharka Afraad

| | | | |
|---|---|---|---|
| Aniga, | Adiga, | Iyada, | Isaga, |
| Iyaga, | Innaga, | Annaga, | Idinka. |
| wan, | waad, | wey, | wuu, |
| waynu, | waannu, | waydin. | |

**Anigu** badda waan **tagaa.**
Adigu badda **waad tagtaa.**
Iyadu badda way **tagtaa.**
Isagu badda wuu **tagaa.**
Iyagu badda **way tagaan.**
Innagu badda waynnu **tagnaa**
Annagu badda waannu tagnaa.
Idinku badda waydin tagtaan.

## L A Y L I S

1. **Meelaha bannaan geli erayda geli kara :**

...................................dabbaasha waan jeclahay.

................................ dabbaasha waad jeceshahay.

Caashi dabbaasha ................................ jeceshahay.

Warsame dabbaasha ............................ ............................................

Caasha iyo Warsame dabbaasha ............................ jecelyihiin.

Adiga iyo anigu dabbaasha waynnu ............................................

Adiga, Caasha iyo saaxiibkaa dabbaasha ..................................

Aniga iyo saaxiibkay, dabbaasha waannu ....................................

Adigu iyo Warsame dabbaasha ........................ ...............................

2. **Weydiino :**

1. Adigu kubbadda cagta ma ciyaartaa?
2. Caashi kubbadda kolayga ma ciyaartaa?
3. Warsame kubbadda kolayga ma ciyaaraa?
4. Caasha iyo Warsame kubbadda kolayga ma ciyaaraan?
5. Iyagu kubbadda cagta ma ciyaaraan?
6. Aniga iyo adigu maalin walba dugsiga ma tagnaa?
7. Innagu dugsiga ma tagnaa?
8. Caasha iyo adigu waxbarashada ma jeceshihiin?
9. Idinku waxbarashada ma jeceshihiin?

3. **Ereyadan ku buuxi meelaha bannaan :**

Waad, Idinku, Iyadu, Anigu, Wuu, tagtaa, Waannu, Waydin, Way.

1. .................... Dugsiga waan tagnaa?
2. Iyadu kubbadda kolayga .................... ciyaartaa.
3. Isagu kubbadda kolayga .................... ciyaaraa.
4. Adiga iyo Warsame dabbaasha .................... jeceshihiin.
5. Aniga iyo Caasha dugsiga .................... tagnaa.
6. Idinku calanka .................... jeceshihiin.
7. Adiga, Warsame iyo Canab calanka .................... jeceshihiin.
8. Warsame hooyadii .................... jecelyahay.
9. Annagu hooyadayo .................... jecelnahay.
10. Dadka oo dhammi hooyooyinkood jecelyihiin ....................

4. **Akhri :**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Anigu | buug | | waayey |
| Annagu | buug | baan | weyney |
| Iyadu | buug | bay | weydey |
| Iyagu | buug | baannu | waayeen |
| Adigu | buug | baydun | weydey |
| Idinku | buug | buu | weydeen |
| Isagu | buug | baad | waayey |
| Annagu | buug | | weyney |

5. **Feegar :**

Shimbirayahaw heesa. Hees wanaagsan heesa.

## DHEERIYAA, DHEERIYAA, (Hees)

**Dheeriyaa, dheeriyaa.**
**Dhuxusha ka madoobiyaa.**
**Aabahay baan arkaa.**
**Hal iyo nirig buu wadaa.**
**Hooyaday baan arkaa.**
**Lax iyo nayl bay waddaa.**
**Aabo nirigta uun i sii.**
**Hooyo naysha uun** i sii.
**alla dheeriyaa, dhuxusha** ka madoobiyaa.

| | |
|---|---|
| Dhuxul | dhuxusha. |
| hal | hasha. |
| nayl | naysha. |
| lax | laxda. |

## L A Y L I S


1. **Heestan kor ka qayb.**
2. **Feegar :**

Dheeriyaa, **dhuxusha** ka madoobiyaa.


## SAACADDA

Tani waa saacad. Waxa ay leedahay laba gacmood. Saacadda maxaa lagu falaa? Saacadda waqtiga ayaa lagu eegtaa. Waxa lagu ogaadaa kolba waqtiga la joogo. Saacadaha qaar, gacanta ayaa lagu xirtaa, qaarna miiska ayaa la dulsaaraa. Qaarna derbiga ayaa lagu dhejiyaa. Dugsigaygu waxa uu leeyahay saacad weyn oo ku dhejisan derbiga. Subaxdii marka ay saacaddu tahay toddobada ayaa dawanka Dugsiga loo garaacaa.


| | | |
|---|---|---|
| Adigu | Goorm aad | Quraacataa?<br>Qadaysaa?<br>Dugsiga tagtaa?<br>Seexataa? |




Waa immisadii? Waa kowdii.



Waa immisadii? Waa laba iyo tobankii.



Waa immisadii? Waa laba iyo tobankii iyo rubi.




oo shan la'
oo toban la'
oo rubi la'
oo labaatan la'
oo shan iyo labaatan la'

iyo shan
iyo toban
iyo rubi
iyo labaatan
iyo shan iyo labaatan.

iyo bar.

Guuleed waa arday. Aroorkasta dugsiga waxa uu tagaa toddobada iyo barka. Dawanka waxa la garaacaa toddobada. Guuleed dugsiga waxa uu ka yimaadaa laba iyo tobanka iyo barka.

| | | |
|---|---|---|
| Immisada | ayaad | Seexataa?<br>Toostaa?<br>Quraacataa?<br>Dugsiga tagtaa?<br>Dugsiga ka timaadaa? |

Immisa weydiinood ayaad ka sameyn karta? Samee.


| | | | |
|---|---|---|---|
| Immisada | ayaad | Dugsiga<br>Shinemaha<br>Dukaanka<br>Ciyaarta | ka timaadaa? |

Immisa weydinood ayaad ka sameyn kartaa? Samee.

**Waa immisadii?**

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 10.15 | 10.30 | 10.45 | 4.45 | 3.15 | 2.30 | |
| 8.45 | 1.25 | 11.30 | 5.45 | 2.25 | 1.30 | 12.50 |
| 9.45 | 4.00 | 2.30 | 6.45 | 12.00 | 12.05 | 4.15 |

## G E E D D I



Geeddi waa arday dhigta Fasalka Labaad ee Dugsiga hoose. Waqtiga dugsiga la xiro, Geeddi waxa uu tagaa miyiga. Halkaa waxa ku nool adeerkii Cawaale iyo reerkiisa. Geeddi marka uu miyiga tago, hawsha reerka ayuu ka qayb galaa, waxa uu raacaa ariga. Inta uu ariga la joogo waxa uu akhristaa buugagga uu dugsigiisa kala tago. Maalin walba marka ay barqada tahay ayuu ariga kaxeeyaa. Ariga uu raacaa waxa uu isugu jiraa riyo iyo ido reerkana kama uu fogaado. Marka ay harka tahay ayaa cunto iyo biyo ama caano loo geeyaa. Marka qorraxdu dhacdana ariga ayuu soo hooyaa.

## L A Y L I S

**1. Ffiri sida ereyga midigta ku yaal isu beddelayo.**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Xoolo | Xoolaha | Ari | Ariga |
| Arday | Ardayga | Har | Harka |
| Hawl | Hawsha | Sac | Saca |
| Nal | Nalalka | Barqo | Barqada |
| Reer | Reerka | Lax | Laxda |
| Geed | Geedka | Haan | Haanta |

**Ga Sha Ka Da Ta Ha a**

**2. Weydiino :**

1. Geeddi fasaxa xaggee buu tagaa?
2. Fasaxa muxuu qabtaa?
3. Goorma ayuu ariga kaxeeyaa?
4. Goorma ayuu ariga soo hooyaa?
5. Adigu fasaxa maxaad qabataa?

**3. Meelaha maran, eraydan kuwa ku habboon ku buuxi :**

Waqti, qayb, galaa, waa, nasasho, ido iyo riyo

1. Geeddi .................................. arday.
2. Miyiga uma tago ..................................... keliya.
3. Cali Dugsiga waxa uu yimaadaa ..................................... Hore.
4. Hawsha reerka ayuu ka ..................................... galaa.
5. Arigu waxa uu isugu jiraa ..................... iyo .....................

4. **Weedhahan u fiirso**

**Maxaad samaynaysaa.**

1. Casharkayga ayaan **baranayaa.**
2. Dugsiga ayuu u **socdaa.**
3. Buuggiisa ayuu **akhriyaa.**
4. Cali iyo Warsame kubbad bay **ciyaarayaan.**
5. Isagu buuggiisa ayuu **akhriyayaa.**
6. Imminka maxaad **samaynaysaa?**
7. Macallinka ayaan **dhegeysanayaa.**
8. Dugsiga ayuu **tegeyaa.**

5. **Ereydan meelaha bannaan ku buuxi :**

bartaa, socdaa, akhriyeysaa, ciyaraynnaa, dhagaysanayaa, yaqaan.

1. Dugsiga ayuu ..................................................
2. Gurigiisa ayuu ku ..................................................
3. Ma buugaggii cusbaa baad ..................................................
4. Raadiyow baan ..................................................
5. Caawa kubbad baannu ..................................................
6. Walaalkay si wanaagsan buu Af Soomaaliga u ..................................................


6. **Far Barasho :**

Diin god gel, god goray gel. Goray god gel, god diin gel.

7. **Maxaa aynnu aragnaa?**

1. Kalluunka xaggee laga helaa?
2. Berriga ma ku noolaan karaa?
3. Dugsigiinnu calan ma leeyahay?
4. Gorayadu maxay shimbiraha kaga duwantahay?

## CODKA SHIMBIRAHA



CAASHA: Aroor wanaagsan Warsame. Maxaad sheegtay?

WARSAME: Aoror wanaagsan Caasha. Nabad baan sheegay ee Adigu iska warran.

WARSAME: Saaka markii aan dugsiga ku soo socday waxa aan arkay shimbir aad u qurux badan. Waxa ay lahayd midabbo kala jaadjaad ah: Casaan, Cagaar, Madow iyo Huruud. Geedo ubax ah ayay isaga bood-boodaysay. Waxa ay lahayd af dheer oo hoos u qalooca. Shimbirtaasi marmar bay barbar u duulaysey. Aad baan ula yaabay.

CAASHA: Anigu waxa aan jecelahay codka shimbiraha : Codkeedu ma macaanaa ?

WARSAME: Aad iyo aad buu u macaanaa...... Nabad gelyo dawankii baa dhacaye.

CAASHA: Nabaadiino, Mahadsanid Warsame.

## L A Y L I S

### 1. Feegar :

1. **Aroor wanaagsan.**
2. **Maxaad sheegtay?**
3. **Nabad baan sheegay.**

### 2. Erayadan xarfaha ka maqan dhammee.

| | |
|---|---|
| 1. Ar ............ r | 6. ............ imbir |
| 2. Doo ............ o | 7. ............ Ugsi |
| 3. I ............ an | 8. hur ............ d |
| 4. A ............ day | 9. Ca ............ aan |
| 5. Da ............ a | 10. ............ bax. |

### 3. Meelaha bannaan erayo ku habboon ku buuxi.

1. Aroor ............ .
2. ............ sheegtay.
3. Nabad ............ sheegay.
4. Dawankii wuu ............ .
5. Shimbirtaasi marmar ............ barbar u duulaysay.
6. Geedo ubax ah ayay isaga ............ .
7. Waxa aan arkay shimbiro aad u ............ badan.
8. Ma ............ macaanayd.
9. Waxa ay lahayd af ............ .
10. Waxa aan jecelahay ............ shimbiraha.

**Imminka:** Anigu waxa aan leeyahay qalin.
Adigu waxa aad leedahay qalin.
Annagu waxa aanu leenahay qalin.
Iyadu waxa ay leedahay qalin.
Idinku waxa aydin leedihiin qalin.
Innagu waxa aynnu leenahay qalin.

**Beri hore:** Waxa aan lahaa qalin.
Waxa aad lahayd qalin.
Waxa ay lahayd qalin.
Waxa aannu lahayn qalin.
Waxa aydin lahaydeen qalin.
Waxa aynnu lahayn qalin.

## L A Y L I S

**1. Meelaha maran buuxi.**

Adigu .................... lahayd buug.
Isagu .................... lahaa buug.
Idinku .................... lahaydeen buug.
Innagu .................... lahayn buug.
Annagu .................... lahayn buug.
Iyadu .................... lahayd saacad.
Innagu .................... lahayn .................... .

**2. Weydiinno :**

1. Adigu xoolo ma leedahay?
2. Faadumo xoolo ma leedahay?
3. Caasha iyo Xasan xoolo ma leeyihiin?
4. Anigu xoolo ma lahaa?
5. Iyagu xoolo ma lahaayeen?

**F e e g a r**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Labaatan | Soddon | Afartan | Konton. |
| Xero geel ah. | Tiro Ari ah. | | |

## YEERIS

| | | | |
|---|---|---|---|
| Toddobaad | Qado | Gacan | dhigtay |
| degdeg | casho | indho | dhishay |
| midmid | afur | il | laysay |
| kolba mid | dheri | lug | khiyaamaysay |
| isaguse | xeero | suul | qodday |
| isaguna | saxan | far | shidday |
| miyi | degsi | ciddi | yeeray |
| xilli | fandhaal | laab | hooyo |
| guri | qaaddo | dabar | aabbe |
| bil | koob | fool | saaxiib |
| sannad | joog | waji | walaal |
| quraan | ashuun | baraar | ceddo |
| dawaco | cunto | maqal | jaalle |
| waraabe | libaax | cashuur. | |

## LAYLIS

**1. Weydiino :**

1. Sannadku waa immisa bilood?
2. Saacadda maxaa lagu falaa?
3. Toddobaadku waa immisa maalmood?
4. Dacawada maxaa lagu yaqaan?
5. Waraabaha magac kale ma u taqaan?

**2. Jamac ka dhig ereyadan hoos ku yaal.**
Lug, far, suul, hooyo, saaxiib, il, dheg, ciddi, weji, nirig, ilig, ri', faras.

## BILAHA SANNADKA

**Laba siyaabood oo loo qoro.**

| | |
|---|---|
| Jannaayo | Jan. |
| Febraayo | Feb. |
| Maarso | Maar. |
| Abriil | Abr. |
| Maajo | Maaj. |
| Juunyo | Juun. |
| Luuliyo | Luul. |
| Ogosto | Ogs. |
| Sibtambar | Sib. |
| Oktoobar | Okt. |
| Noofambar | Noof. |
| Diisambar | Diis. |

1. **Laylis :**

   1. Sannadku waa immisa bilood?
   2. Bishani waa tuma?
   3. Bishu waa immisa toddobaad?
   4. Bilaha bishee baad u jeceshahay? Waayo?
   5. Maalintii aad dhalatay goortii ay ahayd ma garanaysaa?

2. **Dhakhso u sheeg :**

   1. Febraayo waxa ku xigta ..........
   2. Abriil waxa ku xigta ..........
   3. Noofambar waxa ku xigta ..........
   4. Oktoobar waxa ku xigta ..........
   5. Ogosto waxa ku xigta ..........
   6. Maarso waxa ku xigta ..........
   7. Diisambar waxa ku xigta ..........
   8. Sibtambar waxa ku xigta ..........
   9. Abriil iyo Juun waxa u dhexeeya ..........
   10. Juun waxa ka dambeysa ..........

3. **Bilahan si kale ma u qori kartaa?**

| | |
|---|---|
| Juun | Sib. |
| Ogosto | Okt. |
| Maajo | Noof. |
| Júlay | Jan. |
| Febraayo | Diis. |
| Noofambar | Abr. |

4. **Ma sheegi kartaa bilaha magacyadooda?**

1. Bisha siddeedaad.
2. Bisha Afraad.
3. Bisha sannadka u dambeysa.
4. Bisha u horraysa.
5. Bisha lixaad.
6. Bisha ugu maalmo yar bilaha sannadka.
7. Bisha dugsiyadeena la furo.
8. Bishii Kacaanka Soomaaliya uu dhashay.
9. Bishii iyo sannadkii aad dhalatay.
10. Bisha la xuso calankeenna.

5. **Ma sheegi kartaa bisha iyo maalinta.**

1. Ardayda.
2. Hooyooyinka.
3. Kacaanka.
4. Israaca.
5. Shaqaalaha.
6. Guulwadayaasha.
7. Dhallinyarada Adduunka.
8. Xoogga Dalka.
9. Macallinka.
10. Calanka.

Casharka Laba iyo Tobnaad

## CIIDDA DHALASHADA




Cabdi waxa uu dhashay bishii Sibtembar sagaalkeedii, 1968. Waxa uu ku dhashay magaalada Muqdisho. Cabdi waa arday. Waxa uu dhigtaa fasalka labaad ee Dugsiga h o o s e. Maanta ayuu Cabdi siddeed jirsaday. Saaxiibadiina waraaqa ayey u soo qoreen ay ku yiraahdeen: «Hambalyo, Hambalyo, Nolol wacan ku waar».

**Buuxi meelaha bannaan :**

1. Magacayga waxa la yiraahdaa ........................................
........................................
2. Magaca aabbahay waa ........................................
3. Waxa aan ku dhashay ........................................
4. Waxa aan ahay ........................................
5. Waxa aan jirey ........................................
6. Kacaanku waxa uu dhashay ........................................
7. Dugsiga waxa aan ku jirey ........................................
8. Waddankeennu waxa uu helay gobanimadii ..................

## ANIGA iyo ANIGUNA



Beri waxa jirey laba dabagaale. Ka weyn waxa la oran jirey Aniga, ka yarna, Aniguna. Aniga ayaa doonayey in uu magaalada tago. Aniguna waxa uu rabay in aanu ka harin.

Aniga: Waxa aan doonayaa in aan magaalada tago.

Aniguna: Aniguna waxa aan doonaya in aan magaalada tago.

Aniga: Horta kabo cusub baan soo gadanayaa.

Aniguna: Aniguna kabo cusub baan soo gadanayaa.

Aniga: Dabadeedna cunto badan baan soo iibsanayaa.

Aniguna: Aniguna cunto badan baan soo iibsanayaa.

Aniga: Ugu dambeyn dhakhtarka ayaan u tegi doonaa oo ilig i xannuunaya ayaan iska soo saari doonaa.

Aniguna: Aniguna ilig ayaan iska soo saari doonaa. Alla mayaa! Maya! Maya! Waa wax xanuun kulul. Nabad gelyo, Anigu ku raaci maayo.

**Weerahan u fiirso.**

Warqad baan qorayaa, saaxiibkayna mid buu qorayaa.
Xirsi wuu ordayaa, Faadumona way ordaysaa.

Aabbahay wuu tukanayaa, hooyadayna way tukanaysaa.
Berrito dugsiga ayaan tegi doonaa, saaxiibkayna wuu i raaci doonaa.

**L A Y L I S**

1. **Dhammee weerahan hoos ku qoran :**

1. Cali kursi buu ku fadhiyaa, Cabdina ..............................
2. Xasan wuu heesayaa, Jaamacna ..............................
3. Iyadu dugsiga ayay ku socotaa, Isaguna ..............................
4. Axmed waa toban jir, Guuleedna ..............................
5. Isaga buugagggiisu way qurux badan .............................. adigana ..............................

## Casharka Afar iyo Tobnaad

**Ereyadan sida loo qoro iyo macnahooda ma taqaan?**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| saacad | gacan | hooyo | saaxiib | oogo |
| nadiif | weynow | isdhegeysi | baal | bad |
| waqti | dhar | cusbataal | cadday | haro |
| aroor | har | wan | qallafsan | dul |
| derbi | ballan | dhinac | waxbarasho | dhul |
| galab | dorraad | bandhig | wareeg | beer |
| galley | habar | naxay | xiddig | beeralay |
| dayuurad | dhegeysi | caano | babay | waddo |
| xoolo | muuq | canbe | dukaan | awr |
| xeeb | faraxal | raadyow | dhar | gogol |

**L A Y L I S**

1. **Meelahan bannaan xarafaha ka maqan ku buuxi.**

Je..........................r; bak..........................yle; m..........................s;

doof..........................r; qool..........................y; quf..........................l;

telif..........................n; mar..........................di; ..........................abeel;

2. **Ereyadan hoos ku qoran kuwee baa isku dhawaaq ah :**

beer, miis, dib, been, sac, ceel, shaar, ban, faras, lix, feer, bil, naag, bad, bun, cad, kubbad, roob,kan, dugsi, maroodi, sun, meel, nool, far, bur.

## Casharka Lix iyo Tobnaad

Aabbahay darraad buu yimid, walaalkayna shalay buu tegay. Walaalkay waxa loo bixiyey Rooble. Waayo waxa uu dhashay iyada oo roob da'yo. Maanta waa Jimce, waa fasax. Hase yeeshee, gurigayaga ayaan ka shaqaynayaa dhar baan mayrannaa weelna waan xalaynaa. Aabbahay saddex maalmood oo keliya, ayuu nala joogayaa: Berri, saadambe iyo saakuun. Dabadeedna meeshii uu ka shaqaynayey buu ku noqon doonaa.

**L A Y L I S**

**1. Meelaha maran buuxi :**

1. Anigu .................................. ........... dugsi ma tago.
2. ....................................... waa maalinta nadiifinta dugsiga.
3. ............................... .... kubbad baan ciyaari doonaa.
4. Berri waxa ka dambeeya ................................ .........
5. Shalay waxa ka horraysay ...................... ......... ...........

**2. Akhri.**

| | | |
|---|---|---|
| Jimce | Jimcaha | Jimcihii |
| Sabti | Sabtida | Sabtidii |
| Axad | Axadda | Axaddii |
| Aqal | Aqalka | Aqalkii |
| Nin | Ninka | Ninkii |
| Magaalo | Magaalada | Magaaladii |

**3. Eray kasta oo «A» ka mid ah, mid «B» ka mid ah ayaa raaci kara; isla raadso.**

| «A» | «B» |
|---|---|
| shaan | gar leh |
| beer | buuxda |
| nin | macaan |
| dhiil | baxday |
| awr | caano badan |
| sac | kurus weyn. |

## Casharka Toddoba iyo Tobnaad

Miyaad ii yeertay shalay?
Haa, waan kuu yeeray.
Maya, kuuma aan yeerin.

****

Miyaad ii yeeri doontaa berri?
Haa, waan kuu yeeri doonaa.
Maya, kuu yeeri maayo.

****

Miyaad u yeertay shalay?
Haa, waan u yeeray.
Maya, uma yeerin.

****

Miyaad u yeeri doontaa berri?
Haa, waan u yeeri doonaa.
Maya, u yeeri maayo.

****

Miyaad noo yeertay shalay?
Haa, waan idiin yeeray.
Maya, idiin ma aan yeerin.

****

Miyaad noo yeeri doontaa berri?
Haa, waan idiin yeeri doonaa.
Maya, idiin yeeri maayo.

****

Miyuu ii yeeray shalay?
Haa, wuu kuu yeeray.
Maya, kuuma uu yeerin.

## L A Y L I S

**1. Weydiino, ka samee dabadcedna ka jawaab :**

miyay; miyuu; miyaad; miyaaynnu; miyaydin.

Sida: Miyuu kuu yceray shalay?

Haa, ..............................................

Maya, ..............................................

**2. Buuxi adigoo isticmaalaya erayga «orod» :**
Sida: miyey orodday?

1. Miyuu ..............................?
2. Miyaad ..............................?
3. Miyaynnu ..............................?
4. Miyaydin ..............................?
5. Miyaan ..............................?

**3. Meelaha bannaan buuxi :**

1. Isagu .............................. ooyey.
2. Iyaku .............................. dabaasheen.
3. Innagu .............................. joognay.
4. Iyadu .............................. carootay.
5. Innagu .............................. gudubnay imtixaankii.

## Casharka Siddeed iyo Tobnaad

**Weedhahan u fiirso :**

Axmed waa inan **buuran.**
Caashi waa gabar **qurux badan.**
Isagu waa arday **dadaal badan.**
Kani waa buug **wanaagsan.**
Kaasi waa qalin **cad.**
Walaashay waa inan **yar.**
Jabuuti waa magaalo **fog.**
Shalay maalin **kulul bay ahayd.**
Ugaaso cambuur **cad bay gashanayd.**
Waddo **toosan** baa la dhisay.

Inan buuran,
Qalin cusub.
Maalin kulul.
Shaar cas.
Waddo toosan.
Geed qalooca.
Habar gabowday.

Madow, cas, huruud, cad, qalooca, toosan, ballaaran, qurux badan, buuxa, maran, weyn, adag, yar, jilicsan.

### L A Y L I S

1. **Ereyada kor ku qoran geli meelaha bannaan. Meelaha qaarkood waxa lagu buuxin kara erayo dhawr ah.**

   1. Inan ..........................................................
   2. Geed ..........................................................
   3. Shaar ..........................................................
   4. Hees ..........................................................
   5. Waddo ..........................................................
   6. Aqal ..........................................................
   7. Kursi ..........................................................

8. Magaalo ...................................................

9. Kabo ...................................................

10. Buug ...................................................

**2. Weero soo geli :**

qoyan, gaaban, fudud, macaan, qabow, jilicsan, madow, dhuuban, ballaaran.

Kani waa wiil.

Kaasi waa wiil

Tani waa gabar.

Taasi waa gabar.

Kuwani waa fardo.

Kuwaasi waa fardo.

**3. Meelaha maran buuxi :**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| wiil | wiilkan | wiilkaa | wiilashan | wiilashaa |
| lug | lugtan | lugtaa | lugahan | lugahaa |
| far | fartan | faraha | farahan | farahaa |
| dugsi | dugsigan | ................ | ................ | dugsiyadaa |
| dheg | ................ | ................ | dhegahan | ................ |
| geed | geedkan | geedkaa | ................ | ................ |
| il | ................ | ................ | ................ | ................ |
| hooyo | hooyadan | hooyadaa | ................ | ................ |
| arday | ................ | ................ | ardaydan | ................ |
| oday | ................ | ................ | odayadan | ................ |
| islaan | ................ | ................ | islaamahan | ................ |

Casharka Sagaal iyo Tobnaad

## BADDA IYO BERRIGA

Dunida aynnu ku noollahay way ballaran tahay, waxayna u qaybsantaa bad iyo berri. Badaha Dunida jiraa meela kala duwan ayey ku yaalliin waxana ay inoo leeyihiin faa'iidooyin fara badan waayo Kalluunku waxa uu ku nool yahay badda; maraakiibta wax inoo keentaa waxa ay martaa badda. Maraakiibtaasi xoolaheenna iyo muuskeennaba ayey dibedda u qaadaan. Berriga isagana waxa ku nool dadka iyo xoolaha Berrigu waxa uu leeyahay buuro iyo bannaan.

**L A Y L I S**

1. **Weydiino :**

   1. Sheeg waxa ku nool berriga.
   2. Sheeg waxa ku nool badda.
   3. Biyaha badda sidee baynnu uga faa'iidaysannaa?
   4. Muuskeenna maxa qaada?
   5. Berriga ma dadka uun baa ku nool?

Casharka Labaatanaad

## AXMED XOOLO-SEEG IYO XAAWA



AXMED: Allow geedku ila jabo.
Wanka Aabbe lay qalo.
Orgiga Hooyo la dubo.
Maqashoon ilaashiyo,
Arigoo aan mayraciyo,
Awrkoo aan soo dabro.
Lo'da aan aroorishiyo,
Nirgahoo la ii diro,
Ayaamo aan ka seexdee.

XAAWA: Axmedow hadduu jabo,
Imminkaba ad soo dhacdo,
Addinkiyo gacmaha iyo
Ilkuhuba ku duulaan,
Arigii laguu qalo,
Adiga oo aan cuni karin maxaad Eebbe uga baryi?

## L A Y L I S

**1. Ereydan weedho soo geli :**

| | | |
|---|---|---|
| Allow | Nirgo | Aroori |
| Waan | Addin | Aroor |
| Dubo | Haddii | Ilko |
| Maqal | Eebbe | Mayrac |
| Ilaali | Raac. | |

**2.**

| Keli | Jamac | Keli | Jamac |
|---|---|---|---|
| Addin | Addimmo | Wan | Wanan |
| Geed | Geedo | Maqal | Maqalo |
| Orgi | Orgiyo | Nirig | Nirgo |
| Ari | Aryo | | |
| Addin | Addimmo | | |

Casharka Kow iyo Labaatanaad

## ARDAYGA WANAAGSAN



Cumar waa inan wanaagsan. Dharkiisa iyo jirkiisuba waa nadiif. Aroor walba hore ayuu u toosaa. Markuu tooso ilkaha ayuu cadeydaa, wejigana waa dhaqdaa, timaha wuu shanleeyaa. Cumar dugsiga kama daaho, barayaashiisa wuu ixtiraamaa, casharkiisana si fiican buu u bartaa. Cumar waalidkii, barayaashiisa iyo saaxiibadiiba way jecelyihiin.

### LAYLIS

**1. Haa iyo Maya qor**

1. Cumar waa arday xun.
2. Dharkiisu waa nadiif.
3. Aroortii hore uma tooso.
4. Dugsiga kama uu daaho.
5. Hooyadii baa wejiga u dhaqda.
6. Marka uu sseexdo wuu cadeydaa.
7. Cumar dadku way neceb yihiin.

**2. Ereyadan kuwa ku lid ah keen :**


Tusaale : Run Been.
Nin, habeen, kulayl, badan, gal, fudud, nadiif, fur, ban, kac, qoyan, xun, jacayl, dheer, wiil.

**3. Ereyadan weedho soo geli :**

Fiican, jecelahay, gaaban, toosaa, tagtaa, cun, baaqday, kuftay, cabbay, seexdeen, qoray, cabsooday.

Casharka Laba iyo Labaatanaad

## BANDHIG XOOLAAD



Maalin Jimce ah ayuu aabbahay i geeyey bandhig Xoolaad, meeshu waxa ay ahayd Xero weyn oo irrid qura leh. Irridda nin baa taagan. Ninkii buu aabbahay laba shilin u dhiibay, isna laba tigidh buu noo gooyey, markaasaannu xeraddii galnay.

Waxa aannu aragnay xoolo farabadan oo kala jaad ah. Xoolahaa waxa ka mid ahaa : Ari, Lo', Geel, Fardo iyo Dameero. Neef waliba meel gooni ah ayuu ku xirnaa. Ninkii lahaana wuu ag taagnaa. Nin waliba neefkiisa ayuu nooga sheekeeyey. Xooluhu aad bay u wanaagsanaayeen wayna qurux badnaayeen, daawashadoodana aad baan u jeclaystay. waxanse aad ula yaabay wan weyn oo aad iyo aad loo naaxiyey.

Wankaasi wananka kale oo dhan wuu ka weynaa. Hase yeeshee, ninkii wanka lahaa waxa uu nagu yiri. «Anigu wankaygu waa afar jir» aad baan u xanaaniyaa caws baan u soo guraa, aroor walbana waan siiyaa. Labadii biloodba mar baan dhakhtarka xoolaha u geeyaa si caafimaadkiisa loo eego. Anigu aad baan u jeclaystay wankaa iyo xoolo kale oo badan oo meesha la keenay.

## LAYLIS

### 1. Weydiino :

1. Maalintee bay inanka iyo aabbihii bandhiga tageen?
2. Bandhigga maxay ku arkeen?
3. Immisa shilin buu odaygu siiyey ninkii irridda joogay?
4. Waligaa bandhigga ma aragtay? Muxuu ahaa?
5. Ereyadan macnahooda sheeg: Bandhig, Irrid, Tigidh, Xannaano.

### 2. Ereyadan jamacooda keen :

Tusaale : **Gacan** **Gacmo.**

Saacad, hooyo, qalin, wan, bad, bare, saaxiib, beer, derbi, kabo, miis, sariir, shaar, waddo, aqal, dugsi, daas, geed, awr, caws, lug, il far, bir, gaadhi, inan, warqad.

### 3. Erayadani waa jamac u rog keli.

Tusaale : **Daaro** **Daar**

biro, fardo, wanan, kumayaal, riyo, hargo, kuraasi, kabo, miisas, sariiro, shaarar,waddooyin, aqallo, dugsiyo, geedo, lugo, indloo, gaadhiyaal warqado.

Casharka Saddex iyo Labaatanaad

## INTAANAD FALIN KA FIIRSO

Waxa la yiri maalin baa dawaco istiri ceel ka cab. Ceelkii bay ku siibatay. Markii ay biyihii ka dheregtay ayey istiri soo bax, hase yeeshee way kari weydey. Dhawr jeer bay isku dayday, ha ahaatee, wey ku guulaysan weydey. Iyada oo sidaa u rafaadaysa ayaa ri' soo dul joogsatay. Ri'dii iyo dawacadii waxa dhex maray sheekadatan :

Ri'dii: Alla waa ceel, imminka ayaan si fiican u haraad bixi doonaa.

Alla waa Dawaco! Naayaahee Dawaco, maxaad qabannaysaa Ceelka gudihiisa?

Dawacadii: Waan ka cabbayaa.

Ri'dii: Oo maxaad baaldiga dusha yaala uga cabbi weydey.

Dawacadii: Biyahan ayaa ka qabow kuwa dusha waana ay ka macaanyihiin. Bal maad ila eegi?

Ri'dii: Haa, beryahanba waxa aan u ciil qabey biyo aad u qabow oo macaan.

Dawacadii: Soo bood aniga ayaa ku qabanayee.
(Ri'dii way soo boodey)

Dawacadii: Saaxiib si fiican biyaha uga dhereg. Miyaanay macaanayn?

Ri'dii: Aad bay u macaanyihiin.
(Markii ay ri'dii biyihii cabtay)

Dawacadii: Riyey, bal biyihii cabtaye ee sidee baad ceelka uga baxaysaa?

Ri'dii: Wallaahi inaan kaba fekerin! Oo heedhee, adigu sidee baad uga baxaysaa?

Dawacadii: Anigu dhawr saacadood baan ku jirey. Welina ma garanaayo sida aan uga bixi doono.

Ri'dii: Aad baan uga xumahay. Hadda maxaa aynnu yeellaa?

Dawacadii: Isug hadda fikrad cusub baan hayaaye.

Ri'dii: Oo maxay tahay?

Dawacadii: Haddii aad ii ogolaatid in aan dhabarkaaga isku taago, debedda ayaan u boodayaa marka aan debedda u baxo ayaan adigana xarig kuu soo tuuri doonaa;
(Dawacadii inta ay ri'dii isku dul taagtay ayay debedda u boodday).

Dawacadii: Ri'yey; saaxiib nabad gelyo.

Ri'dii: Nabad gelyo aa? Miyaad ilowday in aad iga saartid ceelka.

Dawacadii: Waxa ay ahayd in intii aanad ceelka ku soo boodin aad ka fiirsato sidii aad uga bixi lahayd. Wax intaanad falin ka fiirso.
(Dawacadii way iska tagtay. Markaasay ri'dii ciday, hase yeeshee wax ka saara wey weydey dabadeedna halkaas ayay ku dhimatay).

## L A Y L I S

### 1. Weydiino :

1. Dawacadu maxay ceelka ka qabanaysay?
2. dawacadu waxa ay ri'da u sheegtay in biyaha ceelka ku jiraa ay ka macaanyihiin kuwa baaldiga, sidaasi ma runbaa? Maxay sidaa u tiri?
3. Dawacadu ri'dii ceelka ma ka soo saartay?
4. Intii aanay ceelka ku dhicin, ri'du ma ka fakirtay sida ay uga soo bixi lahayd?
5. Dawacadu miyay u kastay in ay ceelka ku dhacdo, mise **wey ku siibatay?**

Casharka Afar iyo Labaatanaad

## SE, MISE, AMA HASE YEESHEE

1. Lo'du biyo badan bay cabtaa, **hase yeeshee** dhaqso ayey u oontaa.
2. Shimbiruhu way duulaan, **hase yeeshee** way daalaan.
3. Kalluunku badda ayuu ku noolyahay, **hase yeeshee** sida dadka uma neefsado.

## SE

1. Lo'du geeso ayay leedahay, dameeruhuse ma laha.
2. Shimbiruhu way duulaan, dadkuse waa socdaa.
3. Kalluunku badda ayuu ku noolyahay, geeluse berriga ayuu ku noolyahay.

## MISE

1. Miyaad tegi **mise** waad aammusi?
2. Miyaad bugtaa **mise** iska jiiftaa?
3. Miyay heesaysaa **mise** way qoslaysaa?
4. Miyuu socdaa **mise** wuu ordayaa?
5. Miyaydin socotaan **mise** weydin ordaysaan?
6. Miyaannu soconnaa **mise** waa nasannaa?
7. Miyaydin socon **mise** waydin nasan?
8. Miyaynnu soconnaa **mise** waynu nasannaa?

## AMA

1. Qalinka qaado **ama** iskaga tag.
2. Xasan wuu yimid **ama** wuu iman doonaa.
3. Anigu iman maayo **ama** waan iman doonaa.
4. Aamini wax bay qoraysaa **ama** wax bay akhriyaysaa.

## L A Y L I S

1. **Ma keeni kartaa weedho ay ku jiraan:**

   se, mise, ama, hase yeeshee.

2. **Buuxi meelaha bannaan:**


| | | |
|---|---|---|
| hilib | hilibka | hilibkii |
| lacag | ........................ | ........................ |
| .................. | ........................ | shimbirtii |
| maqal | ........................ | ........................ |
| nayl | ........................ | ........................ |
| beer | beerta | ........................ |
| bare | ........................ | ........................ |

3. **Ereyada «A» ku jira waxa ay la macno yihiin ama ay isku macno dhawyihiin kuwa «B» ku jira isla doono.**

| A | B |
|---|---|
| kac | wanaagsan |
| ganbo | xooray |
| fiican | hilib |
| mukulaal | eeg |
| kalluun | saqaf |
| tuuray | laxoox |
| cad | kuumi |
| beed | dabbaal |
| canjeelo | mallay |
| gabar | fuul |
| shanlo | bisad |
| fiiri | istaag |
| doqon | inan |

Casharka Shan iyo Labaatanaad

## DHULKAYAGA (Hees)




**Dhulkaayaga Dhulkaayaga.**
**Waw dhimanaynaa Dhulkaayaga.**

**Dhalin iyo dhallan,**
**Waayeelka dhursugay,**
**Waw wada dhànnoo,**
**Waw dhimanaynaa,**

**Dhiig in aan ku shubo,**
**Oo aan dhagar ku galo,**
**Waa ku dhaarsannoo,**
**Waw dhimanaynaa dhulkaayaga.**

**Waw dhalanayoo,**
**Waw dhiirannee,**
**Dhibiyo xumaan,**
**Waa ka dhawraynnaa dhulkaayaga.**

**Kaan ku dhaadanay,**
**Wuu ka dhigo la'yee,**
**Waw dhimanaynaa dhulkaayaga.**

**Weydiino :**

1. Heesta ayaa tiriyey?
2. Heestu maxay ka hadleysaa?
3. «Dhulkaayaga» ma jeceshahay? Waayo?
4. Marka aad weynaato maxaad dhulkaaga u qaban doontaa?
5. Dhulkeennu waa intee?

Casharka Lix iyo Labaatanaad

## MUKULLAASHII GABOWDAY

Islaan gabowday ayaa haysatay Mukulaal gabowday. Markii ay duqowday waa ay ordi kari waydey. Ilkahana wax-ba waa ay ku goosan kari waydey. Maalin bay aragtay jiir. Markaasay ku boodday oo qabatay. Hase yeeshee waa ay qaninii kari waydey. Islaantii Mukulaashii bay u carootay oo ul la dhacday.

Mukulaashii waxa ay islaantii weydiisatay in aanay dilin, waxana ay u sheegtay in ay muddo badan ay u soo shaqaysey imminkana ay u shaqeyn doonto. Waxa kale oo ay u sheegtay in ay u naxariisato oo ay xusuusato wixii ay u soo qabatay markii ay da'da yarayd.

## L A Y L I S

**1. Weydiino :**

1. Mukulaasha ayaa lahaa?
2. Mukullaashu maxaa ay jiirka u qaniini weyday?
3. Sheeg xoolo ama qof gaboobey oo aad u naxariisatay?

**2. Ereydan weedho soo geli :**

Naxariis; Shaqaysay; Shaqeeyey; Gaboobey; Da' Qaniin; Boodday; Booday; Carootay.


**3. Feegar :**

**Magacaygu wa Warsame.** **Waxaan ahay arday.**

Casharka Toddoba iyo Labaatanaad


## U B A X A


Beri waxa jirey ubax aan si fiican u korin. Xididdadiisa buu la hadlay oo uu ku yiri: «Waa in aydun dhulka dheef ba-






dan inga soo qaaddaan si aan degdeg ugu koro». Markaasay xididdadii oo dhammi dheef u soo jiideen. Maalintii dambe ayuu ubaxii daruuraha ku yiri: «Waxa aan idinka baryayaa






in aydun roob ii soo dirtaan». Kolkaasay daruurihii biyo xareed ah ubaxii siiyeen. Haddana ubaxii waxa uu la hadlay qorraxda. Waxa uu ku yiri: «Qorraxyey waxa aan ku wey-

diisanayaa iftiinkaaga in aad i siisid». Qorraxdii iftiin fiican ayey u soo dirtay. Markii uu dheef, biyo iyo iftiin helay ayuu noqday ubax weyn oo qurux badan. Maalin dambe ayaa balanbaalisi ubaxii soo dul martay. «Alla ubaxu qurux badanaa», ayey balanbaalistii tiri. Galabnimadii ayuu inan yari ubaxii gooyey. Beertii uu ku yiilley ayaa dabadeed habeenkii oo dhan ooyeysay.





## LAYLIS

**1. Xarfaha ka dhiman ereyadan buuxi :**

u..................ax; in..................a; xid..................d qor..................x;
ka..................n; d..................ir; ..................alanbaalis; daru..................r;
..................dhi; ard..................y; a..................r; d..................gsi;
dam..................r; s..................cad; in..................n; ooya..................a;
l..................b..................x.

**2. Weydiino :**

1. Dugsigaagu ubax ma leeyahay?
2. Ubaxa maxaa loo beertaa?
3. Ubaxu muxuu la kori waayey?
4. Maxaa uu ku noolyahay ubaxu?
5. Balanbaalistu maxaa ay ubaxa ula yaabtay?

**3. Feegar :**

**Alla ubaxu qurux badanaa!**

Casharka Siddeed iyo Labaatanaad

## WERIS IYO UGAASO



Weris iyo Ugaaso waa laba Gabdhood oo saxiib ah. Laba guri oo isku dhaw bay ku noolyihiin. Labaduba waxa ay ku jiraan dugsiga xaafadooda. Marka ay dugsiga tegayaan iyo marka ay ka imanayaamba way israacaan.

Shalay Weris keligeed bay dugsiga timid. Ugaaso way maqnayd. Intii ay dugsiga joogtay oo dhan, Weris saaxiibadeed waxa ku dhacay bay ka war wareysay. In badan bay isweydiisay «Saxiibadday maxaa helay? Tolow miyay bugtaa?

Wakhtigii dugsigu markii uu dhammaaday, Weris degdeg bay u tagtay guriga Ugaaso. Waxayna ogaatay in ay Ugaaso bukto oo ay sariirta jiifto. Way u tagtay oo ka warsatay sida ay u bugtey. Ugaaso hargab xun baa ku dhacay Weris waxa ay Ugaaso u sheegtay in ay ka xuntahay bukaankeeda. Waxayna Ilaahay uga bariday in uu caafimaad degdeg ah siiyo.

Weris saacad bay Ugaaso la joogtay. Waxayna uga warrantay dugsiga iyo Casharradii maalintaa la soo dhigtay. Ugaaso aabbeheed iyo hooyadeed aad bay Weris ugu mahad naqeen booqashada ay soo booqatay gabadhooda.

**L A Y L I S**


1. Maxaa caado u ahaan jirtay Ugaaso iyo Weris?
2. Maxaa Ugaaso helay ee ay dugsiga u aadi weydey?
3. Intii ay dugsiga joogtay Weris maxay isweydiisey?
4. Ugaaso sidee bay u ogaatay wixii dugsiga ka dhacay maalintii ay bugtay?
5. Saaxiib ma leedahay?

| | |
|---|---|
| Wey | Tagtay.<br>Weydiisay.<br>Warrantay.<br>Mahadnaqday. |

Immisa weerood baad ka sameyn kartaa?

## Casharka Sagaal iyo Labaatanaad

### HIMILADA ARDAYDA .(Hees)





ARDAY : Waxaan doonayaa
Inaan duulo oo
Dannood iyo Wajeer
Diridhaba iyo Harar
Dalka nala ka dhacay
Dib u soo ceshaa.

****

Waxaan doonayaa
Inaan duulo oo
Webiyada durdura
Doc u jeexo oo
Daleedaha bannaan
U dareeriyaa.

****

aan doonayaa
duulo oo
a furoo
a dhammaan
hehoo

Waxaan doonayaa
Inaan duulo oo
Buuraha dadbane
Dalkayaga ku yaal
Waxa dahab ku jira
Soo dibad baxshaa.


••••

Waxaan doonayaa
Dawo inaan bartoo
Hore ugu durkoo
Dadkayaga dhammaan
Kala diriro cudur.

Ardayda oo dhan: Waxaannu dooneenaa
Inaannu diriro oo
Dalkayaga wixii
Daandaansadaba
La dagaallanaa.

Casharka Soddonaad

# ASLUUBTA FIICAN



Sugaal waa arday asluub fiican. Waxbarashada wuu ku wanaagsan yahay. Waalidkii wuu maqlaa. Dharkiisa iyo buugagiisu had iyo jeer waa nadiif. Maalin waliba dhar nadiif ah ayuu dugsiga ku yimaadaa. Sugaal had iyo jeer, kabo ayuu gashadaa waayo, waxa uu iska ilaaliya in cudur lugaha kaga dhaco.

Jimcihii hore, Sugaal waxa uu tegey magaalada. Waxana uu arkay habar tukubaysa; waddada dhexdeeda ayey maraysey. Baabuuro ayaa dhinac waliba kaga yimid. Baabuuradii inta uu joojiyey, ayuu Sugaal habartii gacanta qabtay oo uu waddadii ka saaray. Baabuuradii si wanaagsan bay waddadii u mareen. Sugaal habartii buu weydiiyey halka ay

ku socoto. Habartii waxay ku tiri, «Hooyo, weynow eh, waxa aan ku socdaa cusbataalka». «Aniga ayaa ku kaxaynaya», ayuu Sugaal ku yiri. Habartii, Sugaal way u ducaysay markii meeshii ay rabtay uu geeyey.

## L A Y L I S

1. **Ereyadan meelaha maran ku buuxi :**
   Joogsatay, qabtay, saaray, yiri, xaggee, maqlaa, edeb, dhankiisa, kabo, balcad, ducaysay, had, nadiif, wuu.

   1. Jimcihii hore Sugaal habar buu waddada dhexdeeda ku ..........................
   2. Baabuurtii buu ..........................
   3. Habartii buu ..........................
   4. Baabuurtii si wanaagsan bay waddadii u ..........................
   5. Sugaal habartii waxa uu ku yiri hooyo .......................... baad u socotaa.
   6. Habartii Sugaal wey u ..........................
   7. Sugaal waa arday .......................... fiican .......................... iyo jeer waa ..........................

   9. Waaliidkii .......................... maqlaa.
   10. Waxa uu Sugaal jecelyahay in uu dadka jilicsan uu u ..........................

2. **Weydiino :**

   1. Adigu qofna ma u gargaartey? Maxaad u qabatay?
   2. Qof jaban haddii aad aragtid maxaad u qaban doontaa?
   3. Xooluhu iyago gargaar ma u baahanyihiin?
   4. Waddada baabuurada dhinacee baad ka martaa? Waayo?
   5. Sugaal muxuu baabuurada u joojiyey?

**2. Dhammec :**

1. Imminka roob baa da'aaya.
   Shalay roob baa ..........................
2. Gurigayga marti baa caawa joogta.
   Gurigayga marti baa xalay .......................... .
3. Imminka warqad baan qorayaa.
   Mar dhow warqad baan ..........................
4. Annagu badda ayaannu ku dabaalannaa.
   Shalay aniga iyo saaxiibkay badda ayaannu ku ..........................

**4. Weedho soo geli :**

Gabar, arag, aqal, ladan, badan, dul, dub, lo'.

**5. Buuxi meelaha bannaan sida tusaalaha hore :**

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Annagu | kubbad | baannu | ciyaari | doonaa |
| Idinku | .......... | .......... | .......... | .......... |
| Adiga iyo annigu | .......... | .......... | .......... | .......... |
| Habluhu | .......... | .......... | .......... | .......... |

Casharka Kow iyo Soddonaad

## WARMOOGE IYO MURAAYADDII INDHAHA



Warmooge waa oday reer miyi ah. Waxa uu miyiga ku dhaqdaa ari, geel iyo lo'. Wiil uu Warmooge dhalay ayaa Muqdisho ka shaqeeya. Wiilku aabbihii waxa uu u soo diraa lacag iyo warqado.

Maalin buu wiilkii aabbihii warqad u soo diray. Odaygii si loogu akhriyo nin dukaan leh buu u la tegay. Dukaanlihii intuu muraayad gashaday buu si fiican Warmooge ugu akhriyey. Maalin dambe ayuu odaygii warqad kale wiilkiisii ka helay. Odaygii waxa uu is yiri warqadda cidna ha ula tegin ee inta aad muraayad gashato adiguba akhriso. Waxa uu tegey dukaan muraayadaha indhaha lagu gado. Muraayado badan baa lagu qiyaasay. Kolba tii loo geliyo ayuu is yiraahdaa wax ku akhri.

Mar dambe ayaa ninkii muraayadaha iibinaayey uu ogaadey ulajeeddada odayga. Markaas ayuu ku yiri, «Jaalle Muraayad uma baahnid, ee waxa aad u baahantahay waxbarasho. Waxa aad tagtaa dugsiga dadka waaweyn, halkaas ayaad ka baranaysaa sida wax loo akhristo».

## L A Y L I S

**1. Ma runbaa mise waa been?**

1. Odayga inantiisii baa warqadda u soo dirtay.
2. Warmooge reer magaal buu ahaa.
3. Odaygu wax buu akhriyi yiqiin.
4. Dukaanluhu muu aqoon sida wax loo akhriyo.
5. Odaygu warqaddii dambe isaga ayaa akhristay.
6. Warqadaha boosta ayaa lagu diraa.
7. Warqaddii dambe cid u akhrida ayuu ula tegey.
8. Odayga indhaha ayaa xannuunayey.
9. Warmooge waxa uu fashaa beero.
10. Warmooge inankiisa war kama uu helo.

**Warqaddan ayuu inanku aabbihii u soo diray.**

Muqdisho,
Okt. 20, 1974.

Aabbo,

Salaan badan baan kuu soo dirayaa. Warqaddii aad ii soo dirtayna waan helay. Warkii aad iigu soo qortayna waan wada gartay.

Aabbo, Saddex boqol oo shilin baan kuu soo diray. Boosta ayaan kuugu soo riday, ka qaado.

Aabbo, hooyaday iyo walaalahayba salaan iga gaarsii, sidaa iyo nabad gelyo.

Cabdi.

Warqaddan inan Maxamed la yiraahdo baa saaxiibkiis u diraya. Bal fiiri sida uu u qoray.

---

Muqdisho,
Maajo, 20, 1974.

Jaalle Cali,

Aad baan u caafimaad qabaa. Casharadaydana si wanaagsan baan u bartaa. Shalay dugsigayaga waxa soo booqday Ardayda Dugsiga Hoose ee Afgooye. Kubbad baannu wada ciyaarnay. Annaga ayaana ka badinnay. Iyagu gool bay dhaliyeen annaguna laba gool.

Saaxiib, hooyaday iyo aabbahay way ku soo salaamayeen.

**Sidaa iyo nabad geliyo,**
Maxamed.

---

2. **Ereyadan weero soo geli :**

Oday, helay, tegey, muraayad, gashaday, gashatay, hagaag, fiican, qiyaasay.

3. **Buuxi meelaha bannaan :**

1. Oday ............................... miyi ah ayaa wiilkiisii warqad ka ....................................
2. Wiilkiisu .................................... ayuu ku maqnaa.
3. Dukaanlihii ............................ indhaha ayuu ............................
4. Maalin ........................................ odaygii warqad wiilkiisii ka ......................................
5. Dukaanlihii muraayado badan ayuu odaygii ku ...........................................

4. **Ereyadan isku hagaaji :**

1. iyo, dameer, nin.
2. arday, anigu, ahay, baan.
3. kow, iyo saddex, laba.
4. Siddeedii, saacaddu, aroornimo, waa.
5. Shaarkaagu, nadiif, waa.

5. **Feegar :**

**aqoon la'aan waa iftiin la'aan**
**Waa aqli iyo ilays la'aan.**

Casharka Laba iyo Soddonaad

## HESHIIS DARRO



Laba bisadood baa habeen isa soo raacay guri bay u dhaceen oo ay hilib ka xadeen. Markii ay debedda ula soo baxeen ayay mid waliba doontay in ay ta kale ka qayb badsato. Halkii bay isku laayeen, wajiga ayey iska diirteen. Qaddar markii ay is xagxaganayeen ayay mid tii kale ku tiri: «Naa waa tan oo isku dhimanaye aynu garsoore isula tagno hilibka ha inoo kale qaybshee». Bisaddii kalena taladaa ayay yeeshey.

Waxay u yimaadeen daayeer. Hilibkii bay hor dhigeen; in uu si sinnaan ah ugu qaybiyo ayay weydiisteen. Daayeerkii mindi iyo miisaan buu soo qaatay. Hilibkii buu laba u qaybshay. Qaybba kafad buu saaray. Kolba dhinaca cuslaada ayuu in weyn ka jaraa oo uu cantuugaa ilaa uu hilibkii sidaas ku laastay. Markaasuu labadii bisadood ku yiri : «Sidaas baan midkiinna qayb dheeraad ahi aanay ku raacin». Markaasay labadii bisadood caro iyo ciil uga baxday. Waxay sameeyaanna way garan waayeen. Mid baa tii kale ku tiri : «Bal haddaynnu markii innagu qunyar ku heshiin lahayn, waxaasi oo khasnara ahi inama qabsadeen». Markaasay tii kale tiri : «Waa runtaa».

**L A Y L I S**

**1. Weydiino :**

1. Bisaduhu xaggee bay u dhaceen?
2. Maxay isku laayeen?
3. Maxay isu laayeen?
4. Daayeerkii sidee buu hilibkii ugu kala qaybiyey?
5. Maxay bisaduhu ka caroodeen?
6. Bisadda immisa magac oo kale ayaad u taqaan.

**2. Ereyadan weedho soo geli :**

bisadood, habeen, dhaceen, qayb, islaayeen, weji,diir.

**U fiirso :**

| Keli | Jamac |
|---|---|
| bisad | bisado |
| gabar | gabdho |
| naag | naago |
| dameer | dameero |
| kab | kabo |
| geed | geedo |

**Fiiri marka jamaca tiro la raaciyo sida uu noqonaayo :**

| | | |
|---|---|---|
| bisad | bisado | laba bisadood |
| gabar | gabdho | laba gabdhood |
| naag | naago | laba naagood |
| dameer | dameero | laba dameerood |
| nin | niman | afar nin |
| qalin | qalimo | shan qalin |
| lax | laxo | laba laxaad |

3. **Ereyadan hoos ku qoran jamac ka dhig, dabadeedna tiro raaci :**

Tusaale : Waddan, Waddammo, laba waddan.

| | | | |
|---|---|---|---|
| bil | kiish | buur | shaar |
| sac | wan | beer | kab |
| wiil | geed | ey | waraabe |
| kursi | gaari | dameer | waddo |

4. **Ereyadan meelaha bannaan halka ay ku habbooyihiin ku buuxi :**

awr, jiirka, lax, tuug.

1. shaarkaygii .................................... baa xaday.
2. saddex .................................... **buu rartay.**
3. .................................... bay dawaco cuntay.
4. bisaddu .................................... way ka adagtahay.

5. **Feegar :**

**«Shaqadu waa sharaf».**

Casharka Saddex iyo Soddonaad

## DIIN IYO BAKAYLE



Diin iyo Bakayle ayaa isu faanay. Diinkiiba Bakaylihii ku yiri : «Maad ila beretemi ?» . Markaasuu bakaylihii ugu jawaabay, isaga oo aad iyo aad u yaabsan: Maantuuba diinna maad ila beretemi igu yiri, tolow dhulka ma iskaga tagaa ?»

Daayeer bay isula tageen oo ay ka codsadeen in uu beretensiiyo. Daayeerkii xariijin buu jeexay, geed ay ka soo ordaanna wuu tusay. Waxa uu diinkii iyo bakaylihii ku yiri : «Geedkaa ka soo orda. Kiinnii xariijintan u soo dheereeya ayaa beretenkii ku guulaysan doona».

Daayeerka waxa gargaarayey dabagaale. Dabagaalihii ayaa soo beretensiiyey : «kow! laba! saddex!» Markiiba diinkii wuu orday, hase yeeshee bakaylihiise wuu istaagay. Markaasuu dabagaalihii bakaylihii ku yiri : «Waar maxaad adigu u ordi weydey?» Bakaylihii waxa uu yiri: «Kollay aniga diin iga orod badin maayee, intuu doono ha iska ordo».

Diinkii isagu oradkiisii ayuu iska watay bakaylihiina waa-bu seexday. Markii uu diinkii xariijintii in yar u jirsaday ayuu bakaylihii ka soo daba booday. Hase yeeshee, diinkii-baa xariijintii gaaray intii aannu bakaylihii soo gaarin. Sidaas ayuu diinkii bakaylihii kaga guulaystay.

## L A Y L I S

**1. Ma run baa mise waa been :**

1. Bakaylaha ayaa markii hore faanay.
2. Daayeer bay isula tageen.
3. Beretenkii diinka ayaa reeyey.
4. Xariijintii dabagaalaha ayaa jeexay.
5. Diinku wuu seexday.
6. Daayeerkii buu diinku ka dheereeyey.
7. Bakayluhu beretenkii kama qayb gelin.
8. Bakaylaha iyo diinka daayeerka ayaa isku diray.
9. Bakaylaha lagama orod badiyeen, haddii aannu seexan.
10. Diinku orodka ma badiyeen, haddii bakayluhu uu

**2. Ereyadan weedho soo geli :**

diriro.

Bereten, yiri, maad, codsadeen, isula tageen, dheereeyey, toosay, seexday, xariijin, tallaabo, orday, hase yeeshee, hurdo, canaantay, bilaabay, maantaba.

**Ereyadan u fiirso :**

| | |
|---|---|
| codsasho | codso |
| tegid | tag |
| dheerayn | dheere |
| toosid | toos |
| seexasho | seexo |
| canaanasho | canaano |
| bilaabid | bilow |
| orod | orod |
| biyo | biyee |
| hadal | hadal |

3. **Ereyadani meelaha ay ku habboonyihiin ku buuxi :**

dheereeyey, yiri, orod badan yahay, baa, seexo, raacay, badiyey, beretemay, kaaliyay.

1. Diin iyo dawaco ayaa ........................................ .
2. Warsame iyo Guuleed baa dugsiga isu ........................... .
3. Daayeerkii ............................... is yiri iska ............................
4. Bakaylihii baa orodkii ........................................ .
5. Daayeerka waxa ............................................... dabagaalle
6. «Kow! laba! saddex!» dabagaalihii baa ku ....................
7. Bakayluhu diinka wuu ka ........................................ .

Casharka Afar iyo Soddonaad

## XEELAD DAWACO

Waxa la yiri, libaax, waraabe, goroyo iyo dawaco ayaa xoolo wada lahaa. Dawacadii baa doontay in ay keligeed xoolaha yeelato, si ay keligeed xoolaha ugu harto, waxa ay ku tashatay in ay Jaallayaasheeda kale ay mid mid u disho. Illayn xoog ku dili kari maysee, waxa ay ka fakirtay in ay khiyaamo kolba mid ku disho. Maalin bay dawacadii reer u tagtay, oo ay maqal ka soo laysay. Neefkii ay soo cuntay ayay subagiisii afka iyo wajiga iska soo marisay. Markay Jaallayaasheed u timid buu Waraabihii weydiiyey «Meesha ay subagga ka keentay». «Waar kuu sheegi maayo ee iga tag ayay ku tiri». Waraabihii baa dawacadii baryey oo baryey, ilaa sidu u baryeyey uu ooyey. Dawacadii waxa ay ku tiri «Waar heedhe, orod oo geedkaa halkaa ku yaala ee jirridda ballaaran madaxa la dhac. Subag baa kaaga iman doonee». Waraabihii geedkii ayuu madax la dhacay, hase yeeshee, waxba wey uga iman waayeen. Haddana wuu ku celiyey ilaa uu madaxii dillaacay. Halkaasuu waraabihii ku dhintay.

Waxa timid maalintii goroyada. Dawacadii xabag cadaadeed bay dhagax ku dhoobtay markaasay gorayadii ula timid. Gorayadii baa tiri, «Saaxiib, xabagta wax iga sii». Dawacadii in badan bay u diidey markii dambe ayay ku tiri, «Waxba la idin kala baxsan maayee, bal waa taase qaado maalin dambase ha i weydiin wax». Gorayadii baa xabagtii liqday. Dhuunta ayay iskaga taagtay. Markaasay dawacadii la hadashay, gorayadii illayn may hadli karayne, waxa ay tiri «imm, imm, imm».

Dawacadii libaaxii ayay u tagtay oo ay ku tiri. «Eeyaahee libaax, bal kaalay oo gorayada ka hadli, kibir bay beryahan la hadli weydey». Libaaxii markii uu u yeeray gorayadii ee uu la hadlay ayay waxay tiri, «imm, imm,» libaaxii ayaa dabadeed rumaystay warkii gorayada. Kana carooday kibirka gorayada. Inta uu ku booday ayuu luqunta kala jebshay, halkaasay ku dhimatay.

Maalintii u dambaysay ayay dawacadii libaaxii u soo dhigatay. Libaaxii oo maqan ayay god dheer, dheer u qodday

dabna way ku shidday, qoryo waaweynna dusha ayay ka saartay, kuwaas oo ay caws dusha ka sii saartay. Meel aad u qurux badan bay ka dhigtay. Libaaxii markii uu yimid ayay ku tiri, «Adeer: libaaxow, maanta gogosha aan kuu dhigay bal eeg, halkaa ha iskataagine soo bood, gogosha dusheeda oo ku naso waad soo dhashaye. Libaaxii baa soo booday. Caws-kii iyo qoryihii baa hoos ula dumay markaasuu ku dhacay dab-kii hoostooda ahaa, Libaaxiina halkaasuu ku dhintay. Sidaas ayay xoolihii dawacadii keligeed ugu hartay.

## L A Y L I S

**1. Erayadan qaar kale ku dar si ay weero dhan u noqdaan :**

1. Illayn ma hadli karayne.
2. Libaaxii markii uu yimid.
3. Si ay u yeelato.
4. Si ay ugu harto..
5. Ka sii saartay.

**Erayadan weero soo geli :**

1. Mid mid
2. Khiyaamo
3. Marnaba
4. Laysay
5. Maqal
6. Dumay
7. Illayn

8. Liqday
9. Mergatay
10. Dhuunta
12. Qaadday
13. Qarxay
14. Dhoobtay
15. Kibir

**2. Weerahan dheddig lab u beddel :**

Tusaale : Nacnac bay ula timid .

Nacnac buu ula yimid.

1. Hilib bay liqday.
2. Xabag bay ku dhoobatay.
3. Libaax bay u soo dhigatay.
4. Maqal badan bay laysay.
5. Madaxay qarxisay.

3. **U fiirso :**

1. Anigu waan heesaa, Faaraxna wuu heesaa, Cabdise ma heeso.
2. Madaxa ayaa i xanuunaya, calooshuna wey i xanuunaysaa meel kalese ima xanuunayso.
3. Shaatigaygii walaalkay baan siiyey, kabahaygiina way madheen, saacaddaydiise waan haystaa.

4. **Meelahan maran buuxi :**

1. Inanku wuu fadhiyaa.

   Inantu .................................... way fadhidaa.

2. Faarax wuu socdaa.

   Hibana way ....................................

3. Axmed ma caroodo.

   Samatarna .................................... caroodo.

4. Biyaha waa la cabbaa.

   Shaaha .................................... **waa la dhamaa.**

   Caanaha .................................... **waa la dhamaa.**

5. Cabdi wuu orod badan yahay.

   Calina ....................................

   Cumarse ....................................

Casharka Shan iyo Soddonaad

## HAL XIRAALE

### 1. Bal Garo :

1. Toban shimbirood baa geed ku fadhiyey. Nin baa dhagax ku tuuray oo mid ka dilay? Immisa shimbirood baa geedka dushiisa ku haray?
2. Shaarka aabbahaa seeddigii iyo shaarka hooyadaa walaalkeed iyo shaarka abtigaa marka aad isu wada geysid, waa immisa shaar?
3. Iyamaa culus kiilo cudbiya iyo nus kiilo biro ah ?
4. Waxaa jira tiro u dhaxaysa kow iyo toban (1 - 10). Tirada haddii laba lagu daro tiro ayaa kuu soo baxaysa, haddii laba laga jarana tiro kale ayaa kuu soo baxaysa. Labada tiro ee cusub haddii la is barbar dhigo ta hore laban laab ayay tan dambe ka badan tahay. Soo saar tiraddaas?
5. Magaalada «Boorama» xarfaha ay ka koobantahay haddii aad is dhaafdhaafisid immisa eray baad ka sameyn kartaa?

### 2. Maxaa la yiraahdaa ?

1. Waxa aynu ku karino cuntada ?
2. Waxa aynu shaaha ku karino ?
3. Waxa badda lagu dhex maro ?
4. Ariga yar yar ?
5. Libaaxa dhasha ah?

### 3. Weerahan dib u qor adiga oo beddelaaya meelaha qaldan :

1. Barafku waa kulayl.
2. Jannaayo waa maalinta uu sannadku ku bilaabmo.
3. Caanaha saca madoobi waa madow.
4. Dhuxusha la shitaa waa dhagax.

5. Dabku waa qabow.
6. Bisaddu ama mukulaashu biyaha ayay jeceshahay.
7. Baabuurta dadka ayaa ka dheereeya.
8. Bil waliba waa afartan maalmood.
9. Dadku bariiska way cabbaan.
10. Qorraxdu waxa ay ka soo baxdaa dhinaca galbeed.

**4. U Fiirso Jamaca ereyadan :**

| Keli | Jamac | Keli | Jamac |
|---|---|---|---|
| geed | geedo | wadaad | wadaaddo |
| bisad | bisado | hadal | hadallo |
| ciyaar | ciyaaro | dabar | dabarro |
| shimbir | shimbiro | aqal | aqallo |
| haan | haamo | sadar | sadarro |
| laan | laamo | safar | safarro |
| saan | saamo | dubbe | dubbayaal |
| laab | laabo | oday | odayaal |
| war | warar | go' | go'yaal |
| dal | dalal | nal | nalal |
| raad | raadad | baal | baalal |

**5. Buuxi meelaha maran :**

Tusaale : Laba mid bay dheertahay **Kow.**

1. Saddex mid bay dheertahay ..............................
2. Afar mid bay dheertahay ..............................
3. Shani mid bay dheertahay ..............................
4. Lixi mid bay dheertahay ..............................
5. Toddoba mid bay dheertahay ..............................

**6. Ka fakir tiro ah kow ilaa toban :**

1. Waxa aan ka fakirayaa tiro erey ah. Waxa ay ka kacdaa «sa» sida saddex, waa maxay tiradaasi? Qor.

2. Waxa aan ka fakirayaa tiro. Waxa ay ka koobantahay saddex xaraf oo «Shalamboot» ku jira. Waa maxay tiradaasi? Higgaadi.

3. Waxa aan ka fakirayaa tiro. Waxa ay ku dhammaataa **«ba»** sida laba. Tirada ma sheegi kartaa? Higgaadi.

4. Waxa aan ka fakirayaa tiro. Sida lix bay **«L»** ka kacdaa **«X»** bay ku dhammaataa. Waa maxay tiradaasi?

5. Waxa aan ka fakirayaa tiro. Waxa ay ku dhammaataa **«ow»** sida qabow. Ma sheegi kartaa?

6. Tirada, kow ilaa toban, ereyo ma ku qori kartaa?

**7. Buuxi meelaha maran :**

1. Laba mid bay ka yartahay ................ .
2. Saddex mid bay ka yartahay ................
3. Afar mid bay ka yartahay ................ .
4. Shani mid bay ka yartahay ................ .
5. Lixi mid bay ka yartahay ................ .
6. Toddoba mid bay ka yartahay ................ .
7. Siddeed mid bay ka yartahay ................ .
8. Toddoba saddex bay ka yartahay ................ .
9. Toban laba ayay ka yartahay ................ .

**8. Buuxi meelaha maran :**

1. Laba mid bay dheertahay ................ .
2. Siddeed mid bay dheertahay ................ .
3. Lixi mid bay dheertahay ................ .
4. Kow mid bay dheertahay ................ .
5. Afar mid bay dheertahay ................ .
6. Toddoba mid bay dheertahay ................ .
7. Saddex mid bay dheertahay ................ .
8. Sagaal mid bay dheertahay ................ .

Casharka Lix iyo Soddonaad

## ABEES IYO DABAGAALE

Waa baa waxa jiri jirey abees boqor ah. Magaciisa waxa la oran jiray Kuseyl. Maalin buu dabagaale abeeskii u soo dacwooday. Dabagaalaha waxa laga xaday haruur uu meel ku aastay :

| | |
|---|---|
| Dabagaale : | Boqor Kuseyl, hauur baan meel ku xabaashay. |
| Abees : | Ragga shaqo badnida waa lagu yiqiin. |
| Dabagaale : | Nin baa haruurkii iskala baxay. |
| Abees : | Taasi waa damac badnida dadka. |
| Dabagaale : | Markaas baan ninkii dhirbaaxay. |
| Abees : | Nin la dhacay siduu yeeli jiray baad yeeshay. |
| Dabagaale : | Markaas buu ninkii i legdey. |
| Abees : | Waa nin laga adag yahay sidii loo geli jiray. |

Dabagaalihii markuu arkay inaanay dacwadiisii faa'iido ka soo jeedin ayuu carooday oo abeeskii iskaga tegey.

### L A Y L I S

**1. Ma runbaa mise waa been :**

1. Dabagaaluhu mas boqor ah buu u tegey.
2. Dabagaalaha haruur baa laga xaday.
3. Magaca dabagaaluhu wuxuu ahaa Boqor Kuseyl.
4. Haruurka dabagaalaha jiir baa ka xaday.
5. Abeesku dacwadii dabagaalaha si wanaagsan uma uu qaadin.

**2. Maxaa la yiraahdaa :**

1. Meesha hilibka lagu gado.
2. Ninka [illegible]
3. Meesha wax lagu [illegible]
4. Ninka dharka tola.
5. Meesha wax lagu kariyo.
6. Ninka gaariga kaxeeye.
7. Ninka timaha xiira.
8. Meesha dacwadaha lagu qaado.
9. Ninka dadka daweeya.
10. Meesha daawada lagu gado.

Casharka Toddoba iyo Soddonaad

## ARDAYDII DHULKAYGAY (Hees)



**Ardaydii dhulkayga,**
**Arax iyo halbowlow,**
**ubaxii furnaayee,**
**aduunyadu u qososhow,**
**waan idin sugeynaa.**

**Indhihii dillaacee,**
**aragtida wacnaayow,**
**ubadkii nasiibiyo,**
**aayaha lahaayow,**
**waan idin sugeynaa.**

**Ilayskii baxaayee,**
**dadku ku ambaqaadow,**
**aabihiyo hooyada,**
**aayaamaha kan dhowow,**
**waan idin sugeynaa.**

**Waa inaad dadaashaan,**
**dalka iyo dadkiinaba,**
**waa inaad daryeeshaan,**
**oo aad dadaashaan.**

## L A Y L I S

**1. Ereyadan macnahooda sheeg, dabadeedna weedho soo geli :**

dhulkayga, wacan, ayaamo, arax, ilays, nasiib, halbowle, dhow, qosol, aayo, dal, daryeel.